



Certification Extension Waiver (Cadeynta Ka dhaafida Kordhintaa)

Su'aalaha Badanaa La Is-Weydiyo

Ka bilow Abriil 23, 2020, Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka waxay balaarinayaan moddooyinka cadeynta ee qoysaska elh Dib u eegida U qalmida sabab la xiriirto bisha Abriil ama Maajo oo lix bilood oo dheeraad ah, lagu kordhinayo cadeymahaan illaa Oktoobar iyo Nofeembar 2020. Tani waxay quseysaa Temporary Assistance for Needy Families (Caawinta Ku mealgaarka oo Qoysaska Baahan); Aged, Blind or Disabled (Waayeel, Camoole ama Curyaan) iyo Housing Essential Needs (Baahiyada Muhiimka Guriyeynta); Working Family Support (Taageerada Qoyska Shaqeynayo); iyo dhammaan barnaamijyada Caawinta Cuntada. Waaxda waxay sidoo kale ka dhaafeysaa sharuudaha Dib u eegida Cadeynta-Dhexe ee Abriil iyo Maajo, iyo faa'diooyinka way sii soconayaan illaa dhammaadka muddooyinka cadeynta iyada oo qoysaska buuxiyaan dhammaan sharuudaha u qalmida.

Taariiqahay ayay midaan bilaabataa?

Abriil 23, 2020

Barnaamijyadde ayay midaan saameysaa?

Temporary Assistance for Needy Families (Caawinta Ku mealgaarka oo Qoysaska Baahan)ama TANF; Aged, Blind or Disabled (Waayeel, Camoole ama Curyaan), ama ABD, iyo Housing Essential Needs (Baahiyada Muhiimka Guriyeynta), ama HEN; Working Family Support (Taageerada Qoyska Shaqeynayo) ama WFS; iyo dhamaan barnaamijyada Kaalmada Cuntada.

Ka waran kordhintaa Juun?

Waqtigaan, USDA Food and Nutrition Service (Adeegyada Cuntada iyo Nafaqada USDA) ayaa ansixiyay kordhimada billaha Abriil iyo Maajo kaliya. Haddii bil-laha dheeraadka ah la ansixiyo, isgaarsiinta dheeraad ah aaya la siideynaya.

Sidee ayay DSHS uga baaran dageysaa wacitaanada u qalmida iyo dib u eegida cadeynta dhexaadka ka hor Abriil 23, 2020?

DSHS waxay sii wadeysaa uga baaran dagida iyaga sida caadiga ah illaa Abriil 23, 2020.

Ka waran haddii ay dhameystiro dib u eegida ka hor Abriil 23, 2020?

Ka dhaafidaan kuma quseyo adiga haddii aad dhameystirtay dib u eegida u qalmidaada ka hor Abriil 23, 2020, sida faa'idooyinkaaga horaan dib loo cadeeyay 12 bilood. Ka dhaafidaan kuma quseyo adiga haddii aad dhameystirtay dib u eegida cadeyntaada dhexe ka hor Abriil 23, 2020 sida aad sii wadeysid muddaad cadeynta caadiga ah.

Ka waran haddii aan soo diro dib u eegida u qalmideyda ka hor Abriil 23, 2020, laakin ma dhameystiran wareysiga?

Waaxda waxay si toos ah u cadeyneysaa dacwadaada oo lix bilood dheeraad ah, iyo isbadelada waxaa looga baaran dagayaa iyada oo la istcimaalayo isbadelkeena caadiga ah ee sharciyada xaalada. Haddii isbadelka sababo faa'idooyinkaaga inay yaraadaan, waxaad heleysaa warqad kuu sharaxeyso sharciyada quseeyo xaaladaada.



Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives

Haddii isbadelka caadi ahaan u kordhiyo faa'idooyinka, laakin aadan bixin cadeynta, faa'idooyinkaaga waxay ahaanayaan sidooda.

Ka waran haddii aan dhameystiro dib u eegida u qalmideyda ka hor Abriil 23, 2020, oo aan la sugeyn warbixin dheeraad ah, laakin aanan weli soo celin warbixinta?

Waaxda waxay si toos ah u cadeyneysaa dacwadaada oo lix bilood dheeraad ah oo waxay ula dhaqmeysaa dib u eegidaada u qalmida la sugayo sida isbadelka xaaladaha. Haddii isbadelka sababo faa'idooyinkaaga inay yaraadaan, waxaad heleysaa warqad

kuu sharaxeysa sharciyada quseeyo xaaladaada. Haddii isbadelka caadi ahaan u kordhiyo faa'idooyinka, laakin aadan bixin cadeynta, faa'idooyinkaaga waxay ahaanayaan sidooda.

Ka waran haddii dib u eegideyda u qalmida Abriil la helo Abriil kadib 22, 2020?

Dib u eegida u qalmidaada waxaa loola dhaqamaya sida isbadelka xaalada, illaa aad soo wacdid oo aad la hadashid shaqaale. Haddii looga baaran dago sida isbadelka xaalada, oo isbadelka kugu sababo in faa'idooyinkaaga yaraadaan, waxaad heleysaa warqad sharaxeysa sharciyada quseeyo xaaladaada. Haddii isbadelka caadi ahaan u kordhiyo faa'idooyinka, laakin maadan bixin cadeynta, faa'idooyinkaaga waxay ahaanayaan sidooda.

Miyaan helayaa warqada joojinta haddii aanan dhameystirin dib u eegida u qalmideyda taas oo lasugayo Abriil?

Majiraan, warqada joojinta oo aan la ansixin Abriil ama Maajo.

Miyaan helayaa warqada i xasuuusineyso dhameystirka dib u eegida u qalmida ee Maajo 2020?

Maya, waraaqahaan lama ansixinayo.